



# Department of Justice

WAR-SAXAFEED  
KHAMIIS, 27 MAAJO, 2021  
[WWW.JUSTICE.GOV](http://WWW.JUSTICE.GOV)

CRT  
(202) 514-2007  
TTY (866) 544-5309

## **Waada Cadaalada Settles ee Maine School District Si ay u Ilaaliso Xuquuqda Waxbarashada Ardeyda Naafada iyo Bartayaasha Ingiriisida**

### *Heshiisku Wuxuu Tirtirayaa Nidaamka Dhaqanka Maalmaha Dugsiga Kooban ee Naafada*

WASHINGTON – Maanta Waaxda Cadaaladu waxay ku dhawaaqday heshiiska dugsiyada Lewiston Public Schools inay soo af jaraan nidaamka iyo dhaqanka takoor degmada eek a saarida ardeyda maalmaha dugsiga dhameyska tiran ee maalmaha dhameyska tiran sabab hab-dhaqankooda la xiriira naafahooda awgeed. Dejintu waxay sidoo kale uga baahan tahay in degmadu siiso fursado isku mia ardeydeeda Bartaasha Ingiriisida. Waaxdu waxay fulisay baadhitaankeeda Ciwaanka II Xeerka Naafada Mareykanka (ADA, *Americans with Disabilities Act*) iyo Xeerka Fursadaha loo Siman yaha ee Waxbarashada ee 1974 (EEOA, *Equal Educational Opportunities Act*) ka dib markay ka heshay cabashooyin naafo Maine (*Disability Rights Maine*).

Baadhitaanka waaxdu wuxuu helay in degmadu si joogto ah usoo koobto maalinta ardeyda dugsiga ee ardeyda naafada ah iyadoon tixgalin baahiyahooda shakhsiyadeed ama sahamin taageeroyin si ay dugsiga ugu sii jiraan maalinta oo dhan. Bilaa tababarka degmada ee shaqaaluhu siday si wanaagsan uga jawaabi lahaayeen naafada ardeyda ee la xiriirta hab-dhaqanka ay keentay isku haleynta maalmaha dugsiga “lasoo-koobay”. Degmadu waxay dhaawacday ardeyda iyadoo inta badan ku guul daraysaneysa inay siiso tilmaama ama taageero hab-dhaqan inta lagu jiro wakhtiga ay dugsiga ka maqan yihiin. Baadhitaanka waaxdu wuxuu sidoo kale sheegay in degmadu ku guul daraysatay inay siiso adeegyo ku haboon ardeyda Bartayaasha Ingiriisida, kuwaasoo badankoodu kusii jiray barnaamijka Bartaha Ingiriisida sanado aanay waligood ku wanaagsanaan Ingiriisida. Natiijadaasi awgeed, in badanoo Bartayaasha Ingiriisida, oo ay ku jiraan muhaajiriinta iyo qaxootiga Soomaaliya, Angola iyo wadamo badan oo Afrikaan kale, waxay waajeheen dib u dhacyo badan oo ku yeelan kara cawaaqib jiraysa.

“Ardeyda naafada ah iyo ardeyda baranaysa Ingiriisidu waxay u baahan yihiin caawimo dheeriya iyo adeegyo dugsiga ah – maaha caqabado dheeriya,” waxa yiri Maamule ku Xigeenka Caawiyaha Xeer-ilaaliyaha Guud Kristen Clarke ee Waaxda Cadaalada Qeybta Xuquuqda Shacabka. “Siinta ardeyda naafada ah kala badhka waxbarashada ay xaqa u leeyihiin maaha wax la aqbali karo. Ku guul daraysiga in si wanaagsan loogu adeego ardeyda baranaysa Ingiriisidu waxay xadidaysaa fursadahooda guusha ee dugsigooda iyo wixii ka danbeeyaba. Waaxda wax aka go’an dhaqan-galinta sharciga si loo hubiyo in dugsiyadu buuxiyeen baahiyaha iyo codsiga xuquuqda dhamaan ardeydooda.”

“Waxa lanagu dhiirigaliyey in Lewiston Public Schools la shaqeeyaan baadhitaankayaga, ay aqoonsadeen fursada si loo hroumariyo, waxaana ka go’an hirgalinta guusha leh ee heshiiskayaga,” waxa yiri Xeer-ilaaliyaha ku Meel-gaarka ah ee Mareykanka Donald E. Clark ee Degmada Maine. “Waxaanu rajeynaynaa inaan kala shaqeyno degmada horumarinta fursadaha waxbarasho ee dhamaan ardeyda.”

Xeer-ilaaliyayaasha Qeybta Xuquuqda Shacabku waxay fuliyeen baadhitaanka iyagoo la shaqeynaya Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Mareykanka ee Degmada Maine.

Dhaqan-galinta Ciwaanka II ee ADA dugsiyada iyo EEOA waa ahmiyada ugu sareysa ee Qeybta Xuquuqda Shacabka. Macluumaad dheeriya oo khuseeya Qeybta Xuquuqda Shacabka waxaa laga heli karaa waybsaaydkooda [www.justice.gov/crt](http://www.justice.gov/crt), macluumaad dheeriya oo khuseyaa Qeybta fursadaha waxa laga heli karaa <https://www.justice.gov/crt/educational-opportunities-section>. Dadweynuhu waxay kusoo warin karaan xuquuq shacab jabinta macquulka ah <https://civilrights.justice.gov/report/>.

###

21-XXX

HAKUSOO JAWAAB CELIN FARIINTAN HADII AAD QABTID WAX SU’AALAH, FADLAN ISTICMAAL XIRIIRKA FARIINTA AMA WICITAANKA. XAFIISKA ARIMAHA DADWEYNAHA 202-514-2007.